



Xarunta Macaamiisha Länstrafiken Kronoberg

Växjö Resecentrum

Saacadaha furitaanka

Isniinta–Jimcaha	06.00–19:00 fiidnimo
Sabti	08.00 - 14.00
Axad	12.00–18.00

Macuumaadka xilliyada ka duwan waxaad ka helayaas
lanstrafikenkron.se/vaxjo
Alaabta la helo: 0733-47 79 26

0771-76 70 76

kundcenter@lanstrafikenkron.se

Wadajir
Ugu socda mustaqbal waara

Waxa wanaagsan in la ogaado

- Xadka da'da**
Qof weyn waxa laga tirinayaa laga bilaabo maalinta aad 20 sanno jirka buuxiso. Waxa markaa shaqeynaaya qiimaha tigidhka ee cadiga ah. Markaad Denmark u safraysid, ayaa qof weyn lagugu xisaabinayaa isla markaad 16 sanno jir gaarto.
Carruurta/dhallinyarta ilaa iyo da'da 19 sanno jir waxay ku safrayaan tigidh carruur/dhallinyaro iyo tigidhka xilliga firaaqada ah. Haddii da'da laga shakiyo waa inaad ID-kaadh tusi kartaa, haddii kale qiimaha heerka da'da ugu dhow ayaad bixinaysaa.
Carruurta 0–6 sanno jirka ayaa bilaash ugu safraysa haddii ay qof weyn oo lacag bixinaaya la socdaan (ugu badanaan laba carruur ah qofkii kasta oo lacag bixinaayaba). Waxa qof weyn oo lacag bixinaaya loo tirinayaa tigidhka halka mar, tigidhka 24- iyo 72 tigidhka saacada, Tikidhka xilliyada ee dadka waaweyn iyo Tikidhka xilliyada ee ardeyga. Carruurta aan qof weyn oo lacag bixinaaya la socon waxay bixinayaa ta carruurta/dhallinyarta. Musaafurku (qofka safrayaa) waxa uu kooxda da'da badaleeya maalinta uu 7 sanno jir buuxiyi. Haddii da'da laga shakiyo waa inaad ID-kaadh tusi kartaa, haddii kale qiimaha heerka da'da ugu dhow ayaad bixinaysaa.
- Gaadhiga carruurta** - Haddii uu boos banaan jiro ayaa gaadhiga carruurta la qaadan karaa lacag la'aan. Gaadhiga carruurta ee loo isticmaalo wixii aan aheyn carruur in lagu qaado ayaa la bixinayaa kharash la mid ah ka carruurta/dhallinyarta.
- Carruurta/dhallinyarta** Haddii qofka musaafurka ahi uu bixinaayo kharashka carruurta/dhallinyarta, 0-19 sanno jirka, waa in musaafurku taas dirawelka hore ugu sii sheegaa, haddii kale waxa shaqeynaaya/la bixinaaya tigidhka qofka weyn.
- Baaskiil** - Waxaad tareenka iyo basaska gobolka la saaran/qaadan karaa baaskiil haddii uu boos banaan yahay. Gaadiidka magaalada dhexdeeda ee gobolka Kronobergs län ayaan la ogoleyn in baaskiil la saarto. Waxa la ogol yahay in la soo qaato baaskiilka isku laablaabma, iskooterka korontada, kickbike iyo mikrobike haddii uu wax badan isku wada laabmaayo
- Wax ku cunista gaadiidka guudkiisa** Cunto iyo cabitaan ayaa la soo qaadan karaa iyadoo loogu cuni doono si aan wax dhib ah u keeneynin dadka kale ee musaafiriinta ah iyo inaan waxyeelo la gaadhsiin agabka gaadiidka gobolka iyo kuwa dadka kale ee musaafiriinta ah ay leeyihiin. Waxyeelada noocan oo kale ah ayaa uu musaafirku masuul ka yahay. Cabitaanada khamriga ku jirro waa inaan lagu cabin baska ama tareenka dhexdiisa, meelaha sugitaanka ama meelaha la hadhsado/dhaxanta laga galo.
- Baadhitaanka/kharashka ganaaxa** - Haddii aanad tigidh haysan ama tigidh qalan la sidato marka baaritaan yimaado waa inaad ganaax dhan 1200 kr bixiso.
- Xawayaanka wehelka** - Eeyga, bisada ama wixii xawayaanka yaryar ah ee kale ayaa la qaadan karaa lacag la'aan haddii aanay wax dhibaato ah u keeneyn dadka kale ee musaafiriinta. Xawayaanku waa inay xilliga xakameysnaadan ama ay ku jiraan shandadada ama qafis. Xawayaanka waa inaan la saarin kuraasta/meelaha lagu faadhiisanaayo.
- Bagaashka gacanta** - Waxaad kharash la'aan qaadan kartaa into bagaashka gacanta ee aad si dhib yar u qaadi karto. Bagaashka gacantu waa inaanu xidhin marinada dhexe ama aan la saarin kuraasta lagu fadhiisto dushooda.
- Cabista sigaarka** - Waa mamnuuc in sigaarka lagu cabo, taasina waxay xataa khuseysaa, sigaarka elektarooniga, basaska, tareenka, goobaha sugitaanka ama meelaha la hadhsado/dhaxanta laga galo.

Miyaad macluumaad dheeraad ah rabtaa, soo gal lanstrafikenkron.se oo ka dibna guji calaamadan geeska kore ee midig ku taala. Markaas ayaad bogga ku turjumi kartaa luqadda aad rabtid.

Inta aag	Tigidhka halka mar Qiimaha caadiga		Tigidhka halka mar qiimo dhimis 10 %*	
	Carruurta/ dhallinyarta 0-19 sanno	Qof weyn Laga bilaabo 20 sanno	Carruurta/ dhallinyar 0-19 sanno	Qof weyn Laga bilaabo 20 sanno
1	18	30	16,20	27,00
2	24	40	21,60	36,00
3	30	50	27,00	45,00
4	37	62	33,30	55,80
5	44	74	39,60	66,60
6	52	86	46,80	77,40
7	60	100	54,00	90,00
8	70	116	63,00	104,40
9	76	126	68,40	113,40
10	83	138	74,40	124,20
11	90	150	81,00	135,00
12+	100	166	90,00	149,40

Qiimaha tigidhka halka maroo Karoon ah
* Qiimaha App-ka safarka, Mitt konto iyo mashiinka tigidhada

Goobaha iibka

Alvesta

Pressbyrån
Järnvägsstationen
0472-442 25

Lenhovda

COOP Konsum
Storgatan 53
0474-485 40

Lessebo

COOP Konsum
Storgatan 71
0478-100 04

Ljungby

Willys förbutik
Garvaren,
Stationsgatan 2
0372-253 74

Tingsryd

Börjes Tingsryd
Storgatan 66-68
0477-482 00

Markaryd

COOP Konsum
Drottninggatan 28
0433-100 64

Åseda

COOP Konsum
Järnvägsgatan 9
0474-100 16

Älmhult

Sydresor AB
Järnvägsstationen
0476-714 15

Växjö

Pressbyrån
0470-210 21

PG Vejdes väg 29
0470-76 18 75

Storgatan 7
0470-72 91 50

Storgatan 36
0470-212 71

Växjö lasarett
0470-254 29

Maxi ICA
Stormarknad
Grand Samarkand
Hejaregatan
0470-79 99 00

Rugta macaamiisha ee
Länstrafikens
Växjö resecentrum
0771-767076

In lagu safro gaadiidka Länstrafiken Kronoberg – bas iyo tareen.

Shaqeynaaya laga bilaabo 23 Maarso - 31 Diisembar 2021



Tigidhada

Waxaad dhamaan tigidhada halka mar iyo tigidhada xilliga ka iibsan kartaa App-ka safarka, Mitt konto, baska guudkiisa, goobta iibka iyo Xarunta Macaamiisha. Waxaad xitaa tigidh ka iibsan/gadan kartaa oo aad tigidhka xiliyada dib uga buuxsan kartaa mashiinka tigidhka.

Tigidhka halka mar

Haddii aad tigidhka halka mar ku safrayso ayaa App-ka safarka uu yahay waxa kuugu haboon. Waxaad xitaa dooran kartaa inaad tigidhka halka mar kaadhka safarka ku xidho.

Waxa qiimaha tigidhka halka mar go'aaminaaya tirada aagaga iyo da'da musaafiriinta. Tigidhka halka mar ee safarka tareenka waxa uu ku siinayaa safarka basaska oo bilaash u ah aagga bixitaanka iyo imaanshaha labadaba.

Tigidhka 24-saacadood ah

Qofka safaro badan oo isla khad kaliya ah sameynaaya muddo habeen iyo maalin ah, ayaanu u soo jeedinaynaa tigidhka 24-ka saac ah. Tigidhka 24-ka saacadood ah qiimahiiisu waxa weeye sida laba tikidh oo kuwa halka mara ah ee khadka la doortay kaas oona shaqeynaaya 24 saacadood.

30-ka maalmood ah

Qofka badanaa isla khad kaliya ku safra ayaa tikidhkayaga 30-maalmood uu yahay waxa ugu raqisan. Waxa tigidhka lagu heli karaa safarka tareenka iyo/ama baska. Waxa uu tigidhku keenayaa inaad bilaaw xad 30 maalmood ugu safarto khadka la doortay. Tigidhada 30-maalmood ah ayaa lagu heli karaa isagoo loogu talo galay dadka waaweyn, carruurta/dhallinyarada iyo ardeyda.

tigidhka 30-ka maalmood ee tareenka ayaa sidoo kale ku shaqeynaayasafarka baska ee khadka la doortay.

tigidhka 30-ka maalmood ee gobolka waxa uu shaqeynayaa safarka dhamaan gobolka Kronoberg, oo ay ku jiraan gaadiidka magaalada ee Växjö iyo Älmhult.

Tigidhka xilliga firaqada ee loogu talagalay qofka ilaa iyo 19 sanno jirka ah

Tigidhka xilliga firaqada waa tigidhada xilli 30-maalmood ah kaas oo shaqeynaaya safarada baska iyo tareenka ee gobolka oo dhan. Waxa uu tigidhku shaqeynayaa Isniinta-Jimcaha laga bilaabo saacadaha 14.00- 04.00 iyo habeen iyo maalinba maalmaha Sabtida - Axadda. Maalmaha fasaxa iyo maalmaha waxbarashada inta lagu jiro simistarka wuxuu shaqeynayaa xilliyo la mid ah kuwa maalmaha shaqada. Maalmaha fasaxyada iyo fasaxa isku xiriirsan ayaa xilliga uu shaqeynayaa ay tahay mid la mid ah ta Sabtiyada/Axaddaha. **Qiimaha kaadhku waa 200 karoon**, u shaqeynaaya carruurta iyo dhallinyarada ilaa 19 sanno jirka ah. Waaa in tigidhka lagu iibsado telefoonka Tigidhka xilliga firaqada lagu isticmaalaayo.

Tigidhka 72-saacadood ah

Haddii aad booqasho kumeelgaar ah ku joogto Kronoberg ayaa tigidhkayaga 72-ka saacadood uu yahay wax adiga kugu habboon. Dooro haddii aad rabto tigidhka 72-saac ah oo magaalada Växjö dhexdeeda ah ama basaska iyo tareennada gobolka oo dhan.

tigidhka 365-maalmood ah

Tigidhkayaga 365 maalmood ah ayaa kuu faa'iido badan haddii aad si joogto ah anaga noola safarto. Waxa uu qiimaha tigidhku u dhigmaa sagaal iyo bar tigidhada 30ka maalmood ah. Waxa weeye inaad laba bilood iyo bar heleyso markaad iibsato tigidhka 365-maalmood ah.

Qiimo dhimis

10% janaalada isku-adeegidda

Haddii aad tigidhka halka mar-ama tigidhka xilliga ka iibsato App-ka safarka ama mashiinka tigidhada ayaa heli doontaa qiimo dhimis 10% ah oo qiimaha caadiga ah ee tigidhka.

Qiimo dhimista dadka wada socda

Qiima dhimista dadka wada socda ayaa ku siineysa qiimo dhimis 25% oo sicirka iskugeynta tigidhada ah, markaad lama ama wax ka badan oo wada safraaya tihiin oo aad isku iibsataan/gadataan tigidh halka mar ama tigidhka 24-ka saacadood. Qiimo dhimista dadka wada socda waxay ka shaqeynaysaa gudaha Kronoberg laakiin sidoo markaad iibsato tigidhka halka mar ee gobollada deriska la ah. Waxa qiimo dhimista looga goynayaa toos/otomaatig iyadoo aan loo eegin meesha aad tigidhka ka iibsatey.

Qiimo dhimisita tigidhka halka mar ee carruurta iyo dhallinyarta

Carruurta/dhallinyarta ilaa iyo 19 sanno jir waxa la siinayaa qiimo dhimis 40 % ah oo qiimaha tigidhka halka mar ee qofka weyn.

Qiimo dhimis 25% oo carruurta/dhallinyarada iyo ardayda

Musaafiriinta ay da'doodu tahay 0-19 jir iyo/ama ardeyda ah waxay heli doonaan qiimo dhimis 25% dhan oo tigidhada 30 maalmood ah

Waxay ardaydu u baahan yihiin kaarka Mecenatkort oo Dijital ah, Kaarka Ardayda (Studentkort) ama WeStudents oo leh sumadda safarka ee ardayga. Marka kantaroolid tigidhada la sameynaayo waa in aqoonsi ardayga oo shaqeynaaya oo leh sumadda safarka ardayda iyo ID sawir ku yaalo la tusi karaa.

Si aad xaq qiimo dhimista ardayda ugu lahaato, waa inaad:
- *Dhigato waxbarasho lagu qaato deeqda waxbarashada ee heer jaamacadeed, kulliyadeed ama waxbarasho kale oo dadka waaweyn ah.*
- *Aad ugu yaraan 50% wax dhigato iyo muddo 10 toddobaad oo isku xiga hal simistar gudaheed ah.*



Safarka sumada ardeynimada

Ka diiwaangeli App-kaaga ama kaarkaaga safarka

Qofka safraaya ayaa masuul ka ah Kaadhkaaga safarka. Haddii kaadhkaagu aanu cilad farsamo darteed shageynaynin ayaanu kaadhkaga lacag la'aan Xarumahayaga macaamiisha ama xafiiskayaga kuugu bedeku.

Haddii aad kaarkaaga safarka Mitt konto ka diiwaangeliso ayaa heli doontaa damaanada haddii uu kaa lumo. Waxay taas micnaheedu tahay in haddii aad kaarkaaga safarka lumiso, ayaaad si fudud tigidhkaaga ugu wareejin kartaa kaadh kale oo safarka ama app-ka safarka iyadoo Mitt konto la soo maraayo. Markaad App-ka lambarkaaga moobaylka ka diiwaangeliso ayaa sidoo kale helayaa dammaanada luminta, taas oo macnaheedu yahay inaanay tikidhadaadu meesha ka bixi doonin haddii aad telefoonkaaga lumiso ama aad App-ka iska tuurto.

Lacag dib u soo celinta

Waxaad App-ka ku haysan kartaa tigidh aan laga shaqeysiin kadib marka uu tigidhku dhacay. Tigidhada iyo sanduuqa macaamiisha ayaan la soo celin doonin.

Kaadhka xilliga oo aan laga shaqaysiin ayaa lagaaga soo celin doonaa xaruntayada Macaamiisha iyadoo lagaa qaadi doono kharash adeega oo dhan 50 Karoon.

Haddii aad aagga badalanayso ama aad u gudbayso kaadh ka qaalisan, ayaa taas laga sameyn doonaa kaarka xilliga ee aan laga shaqeysiin

iyada oo aan kharashka adeega lagaa qadeyn

U wareejinta tigidh ka qaalisan waxa la sameyn karaa xilliga taagan, laakiin mudadda uu shaqeynaayo xiligu waxba lagama badali karo.

Halkan ayaad tigidh ka iibsan kartaa

App-ka safarka

App-kayaga safarka ee Länstrafiken Kronoberg waxaad ka heleysaa qiimo dhimis 10 % ah oo tigidhada oo dhan ah, ha ahaato hal tigidh- ama kaadhka xilliga. Waxaanad ku bixin kartaa Swish ama kaadhka bangiga (Visa ama Mastercard). *Haddii aad rabto inaad kaadhka bangiga ku bixiso, waa inaad markaas kaa ku dartaa habka lacag bixinta marka aad iibsaneyso ama aad hore ugu sii dartaa. Haddii aad 18 jir ka yar tahay oo aad rabto inaad tigidhada moobaylka isticmaasho, waxaad caawimo uga baahan tahay waalid ama mas'uul si kaas loogu xiro kaarka bangiga.*

App-ka safarka ayaa sidoo kale safarka ka raadsan kartaa, ka fiirin doontaa boosteejada kuugu dhow, ka eegi kartaa gaadiidka basaska oo waqtiga xaadirka ah socda iyadoo xilliyada ay bosteejada ka baxyaan aad ka raadin karto. App-ka kala soo deg App Store ama Play Butik.

Mitt konto

Waxaad *Mitt konto* ka iibsan/gadan kartaa oo aad ka maareyn kartaa tigidhka halka mar-iyo tigidhka xilliga oo aad ku xidhi kartaa App-ka safarka ama kaadhka safarka ee kala duwan. Waxaanad ku bixin kartaa Swish, kaadhka bangiga ama sanduuqa macaamiisha. Waxa bilaash in Mitt konto xubin laga noqdo. Haddii aad tikidhada Mitt konto ka iibsato oo aad tigidhka galiso kaarka safarka ama App-ka safarka, ayaaad tigidhka si toos ah ugu safri kartaa.

Tigidhka ka shaqeysiin

Waxaad Mitt konto ka iibsan/gadan kartaa tigidh oo aad dooran kartaa inaanad ka shaqeysiin. Markaad kadib safraysana aad Mitt konto ka shaqeysiin karto tigidhkaaga, mashiinka tikidhada ama markaad baska fuulaso.

Inaad tigidhkaaga qof aad deynsiiso ama iibiso oo aad qof kale u dirto Deyn siinta qof kale waxay micnaheedu tahay in qof kale uu isticmaalo kaadhkaaga shaqeynaayo inta ka hadhsan gaadiidka habeen iyo maaliintiiba. **Tigidhka qof kale ku wareejinta:** Qof kale oo diiwaangashan u dir tigidh aan laga shaqeysiin, markaas ka dib ayaanad tigidhka sii haysan doonin. Waxaad sidoo kale tigidhkaaga u kala **wareejin** kartaa App-ka safarka och kaadhka safarka. Tigidh kasta hal mar ayaa la wareejin karaa.

Xarunta macaamiisha iyo goobaha sii iibinta

Waxaad xataa tigidh ka halka mar iyo tigidhka xilliga oo aad sanduuqa macaamiisha ka iibsan kartaa Xaruntayada macaamiisha ama xaruntayada iibka, halkaas oo aad ku bixin karto kaash, kaadhka bangiga iyo sanduuqa safarka.

Baska guudkiisa

Baska guudkiisa ayaaad ka iibsan kartaa tikidhada hal mar iyo tigidhka xilliyada oo aad lacag ku kartaa sanduuqa macaamiisha. Ku bixi kaarka bangiga iyo sanduuqa macaamiisha.

Mashiinada tigidhada

Haddii aad tigidhka halka mar iibsanaayo ayaaad tigidhada ku daabacan kartaa warqad, tigidhka ayaa si toos ah looga shaqeysiin doonaa. Waxaad xitaa kaadhka safarka dib ugu shuban kartaa tigidhka xilliyada. Waxaad markas dooran kartaa haddii aad rabto in tigidhka toos looga shaqeysiyo ama aad doorato in wakhti dambe laga shaqeysiyo. Waxaad sidoo kale lagaca ku suban kartaa sanduuqa macaamiisha. Waxa uu mashiinka tikidhadu ku yaalaa dhamaan xarumaha tareenka ee gobolka iyo sidoo kale Tingsryd terminal, Ljungby terminal iyo Universitetsplatsen iyo Oxtorget ka Växjö ku yaala.

Kaadhka safarka

Waxaad dooran kartaa haddii aad rabto in kaadhka xilligu uu kaadhka kuugu jiro. Waxaad sidoo kale iibsan/gadan kartaa hal ama wax ka badan oo tigidhka halka mar oo aad kaadhka safarka u gadanayso. Waxaad sidoo kale kaadhka kaga shuban kartaa sanduuqa macaamiisha. Kaadhka safarka ayaa kaliya lagu shuban karaa isla hal nooc oo tikidho ah. Kaadhka safarka ma aha mid shakhsiga u gaar ah, waxaad amaaneysiin kartaa saaxiib ama qof qoyska ka mid ah marka aanad adigu isticmaaleyn. Kaadhka safarku waa cadeyntaada safarka, waan in la sito dhamaan inta aad safarka ku jirto.

Haddii aad tareen ku safrayso oonu tigidhkaagu kaadhka kugu jirin waa inaad sidato risiidh kormeer ah. Waxaad taas ka daabacan kartaa mashiinka tigidhada ama waxaad kuu daabaci kara Xarunta Macaamiisha ama goobta iibka.

Sanduuqa macaamilka

Sanduuqa macmiilku waa qaab lacag bixineed oo loo adeegsan karo in tigidh lagu iibsado. Waxa sanduuqa macaamilka lacag lagaga shuban karaa iyadoo la isticmaalaayo Mitt konto, App-ka safarka, mashiinka tigidhada tikidhada, Xarunta Macaamiisha, goobta iibka iyo baska guudkiisa.

Safaro bilaash ah marka la aadayo ama laga imaanayo daryeelka caafimaadka

Si bilaash ah ayaa ugu raaci kartaa baska haddii aad darawalka tustid warqaddaada balanta (kallelse) ee rug-caafimaad oo gobolka ku taal, iyo ka soo noqodka/laabadka haddii aad risiidka rugta-caafimaadka tustid. Haddii aad doorato inaad daryeelka caafimaadka tareenka u sii raacdo waa inaad markaas tigidhkaaga iibsato safarka hortii. Haddii aadan haysan wax warqad balan ah ama aadan rabin inaad tustid taas, ayaaad tigidh iibsanaayso oo aad hadhow iyadoo risiidhka rugta caafimaadka weheliyo aad u diri doonto Serviceresor Region Kronoberg, 351 88 Växjö. Haddii aad tigidhkaaga ka iibsatey App-ka safarka ayaaad risiidh u diri kartaa emaylkaaga, soo daabac oo u soo dir cinwaanka kor ku xusan. Waxa uu Region Kronoberg kaliya soo celinayaa uun qiimaha safarka baska ee dhabta, waxa loola jeedaa taas waxa lagu bixiyo kaadhka bangiga ama Kaadhka lacagta safarka. Qofka weyn ee balan ka haysta xarun daryeelka caafimaadka iyo daryeelka ilkaha ayaa xaq u leh inuu kharash la'aan soo kaxeysto laba carruur ah oo 6 jir ah ama ka yar. Carruurta ku jirta gaariga carruurta ayaa la soo kaxeysan karaa haddii uu boos banaan yahay.

